



Tallaalka xoojiyaha tallaalka mRNA(Pfizer/BioNTech, Moderna)

Tallaalka mRNA wuxuu si wanaagsan u illaaliyaa covid-19 daran oo isbitaal seexinta ah. Si kastaba, illaaladaan tallaalka aasaaska ayaa si degdeg ah u yareeyo kala duwanaanshaha fayraska hadda jira. Sababtaan darta waxaan ugula talineynaa qof walba laga bilaabo da'da 12 aad inuu qaato tallaalka xoojiyaha.

Waa maxay ujeedka tallaalka xoojiyaha?

Tallaalka xoojiyaha wuxuu xasuusiya difaaca jirka fayraska. Illaalada tallaalka ku aadan cudurada halista ah markale ayay korodhaa oo dheeraataa.

Tan waa muhiim in la ogaado: Iyo kala duwanaanshaha fayraska hadda jira, tallaalka si dirqi ah ayuu u illaaliyaa oo kaliya si kooban ayuu uga hortagaa caabuqa iyo cudurka fudud. Wuu kugu dhici karaa Covid-19 iyada oo aan laga eegin tallaalka.

Ku aadan cida loogula taliyay tallaalka xoojiyaha?

Xoojiyaha waxaa loogu talliyay qof walba oo da'da 12 iyo ka weyn.

Tallada waxay gaar ahaan u quseysaa dadka sida gaarka ah halista fayraska koronaha ugu jiro:

- Dadka 65 sanno jirka ah iyo ka weyn
- Dadka 16 sanno jirka ah iyo ka weyn ee qabo cudurada raago qaarkood¹
- Dumarka uurka ah

Goorma ayuu tallaalka xoojiyaha la bixinayaa?

Tallaalka xoojiyaha ayaa lagu talliyay laga bilaabo 4 bilood kadib tallaalka aasaaska dhameystiran iyo tallaalka mRNA. Tallaalka aasaaska dhameystiran ayaa jirayo kadib

- labo garoojo oo tallaalka mRNA; ama
- Caabuq la xaqiijiyay oo fayraska koronaha + hal garoojo tallaalka oo tallaalka mRNA ugu yaraan 4 isbuuc qeyb ah (iyada oo aan laga eegin isku xigga).

Xittaa haddii uu kugu dhacay fatraska koronaha kadib tallaalka aasaaska, waxaan ku talineynaa tallaalka xoojiyaha. Sida waafaqsan natiijooyinka cusub, caabuqyada ma bixiso illaalo ku fillan oo ku aadan cudurka daran.

Waxaad qaadan kartaa tallaalka laga bilaabo afar sitimaan caabuqa kadib (tixgelinta hakadka ugu yare e 4 ta bilood kadib tallaalka ugu dambeeyay ee Covid-19).

Iyo tallaalka ayaa ah tallaalka xoojiyaha lagu siiyay?

Mabda ahaan, dhib malahan, labada tallaalka ee mRNA la heli karo ee la isticmaalo.

Dadka ka hooseeyo 30 sanno jirka, kuwa xigga ayaa quseeyo: Shaqsiyaadka 18 illaa 29 sanno jirka waxaa loogu talliyay inay qaataan tallaalka xoojiyaha ee la doorbiday tallaalka Pfizer/BioNTech. Shaqsiyaadka 12 illaa 17 sanno jirka waxaa loogu talliyay inay qaataan tallaalka xoojiyaha

iyo tallaalka Pfizer/BioNTech. Tan waxaa sabab u ah dacwadaha dhifka ah ee caabuqa muruqa wadnaha ama fadhiga wadnaha ayaa ku dhaco si degdeg ah tallaalka kadib. Waxaa la arkay inay aad u yara joogta yihiin marka lagu tallaalo tallaalka Moderna badelkii tallaalka Pfizer/BioNTech. Tan ayaa ah saameynta caafimaadka oo aad dhif u ah oo si wanaagsan ayaa loo daaweyn karaa. Caabuq noocaas ah ayaa sidoo kale dhaco caabuqa kadib iyo fayraska koronaha. Si kastaba, labadaba tallaalka ee mRNA, rfaa'idooyinka tallaalka Covid-19 ayaa ka culus halisaha imaan kara, xittaa dadka ka yar 30 sanno jirka.

Halkee ayaan ka heli karaa tallaalkid?

Gobolka ayaa masuul ka ah tallaalka. Ka fiiri websaydka ama Qadka warbixinta ee degmadaada (www.foph-coronavirus.ch/cantons) si aad u ogaatid meesha aad iska diiwaangelin kartid oo aad tallaalka ka heli kartid. Ama weydii dhaqtarkaaga, farmashiistahaaga ama farmashigaaga.

Yaa loogu talliyay tallaalka xoojiyaha dheeraadka ah (kadib markii tallaalka xoojiyaha ugu horeeyay la siiyay)?

Hadeer, tallaalka xoojiyaha dheeraadka ah waxaa loogu talliyay dhammaan dadka ka weyn 80 sanno jirka. Waxaan sidoo kale ugu talinay tallaalka xoojiyaha dheeraadka ah dadka qabo difaaca jirka sida daran u liito (sabab la xiriirto jirada ama daawooyinka) - xaaladaan, fadlan la tasho dhaqtarkaaga.

Tallaalka kaloo xoojiyaha ayaa lagu sameyn karaa laga bilaabo 4 bilood kadib qaadashada tallaalka ugu dambeeyay. Waxay kordhisaa illaalada tallaalka eek u aadan cudurka halista ah markale, ugu yaraan waqti muddo go'an.

Miyuu kugu dhacay fayraska koronaha tan iyo tallaalkaaga ugu dambeeyay? Maadaama caabuqaan uusan si weyn u kordhin illaaladaada ka hortaga cudurka daran, waxaan ku talineynaa tallaalka kaloo xoojiye ah. Waad qaadan kartaa tallaalka laga bilaabo 4 isbuuc caabuqa kadib (tixgelinta hakadka ugu yar oo 4 bilood kadib tallaalka ugu dambeeyay ee Covid 19).

Warbixinta hartay waxay la mid tahay tallaalka xoojiyaha sida aasaaska tallaalka oo waxaa laga heli karaa xaanshida xaqiigda "Warbixinta guud ee tallaalka Covid-19 iyo tallaalka mRNA".

¹Liiska sharaxan ee cudurada waxaa laga heli karaa: *Qeybaha dadka si gaar ah u nugul (PDF, 205 kB)*

